

PHASE 2

Liiska hubinta ee makhayadaha iyo meelaha khmriga lagu cabo



City of Seattle

*#SupportSeattleSmallBiz
#WeGotThisSeattle*

Dulmar Guud

Waa maxay Wajiga 2aad?

Wejiga 2-aad wuxuu u oggolaanayaa ganacsiyada qaarkood iyo in ay ku soo laabtaan howshooda iyada oo la raacayo hagitaan adag ee xagga caafimaadka iyo amniga bulshada. Xubnah qoyska, shaqsiyaadka iyo ganacsatada u baahan tilmaamid gaar gaar ah ayaa ka dalban kara caawinaadda [Jawaabta Coronavirus ee Gobolka Washington](#) (Ingiriis oo keliya), wac Waaxda Gobolka Washington ee Waaxda Shaqada & Warshadaha ee gobolka Washington taleefanka 1-800-547-8367, tarjumaad ayaa la heli karaa ama waxay kula xiriirsiin karaan shaqaalaha Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha in ay ku caawiyan 206-684-8090, turjumaad ayaa la heli karaa.

Goorma ayuu Wajiga 2aad bilaabmayaa?

King County waxey gashay wajiga 2aad laga bilaabo Juun 19. Waaxda caafimaadka ayaa kala noqon karta mudnaantan waqtiga ay doonto. Tusaale ahaan, haddii tirada COVID-19 ay korodho, waxaan ku laaban karnaa wajiga 1.5 ama Wajiga 1.

Waa maxy ula jeedaa Wajiga 2 Adeegyada Guriga?

Marka loo eego tusaha wejiga 2-aad, adeegyada guryaha ee hey'adu qoraneyso waa in ay raacaan shuruudaha caafimaadka iyo badbaadada qaarkood ee adeegyada guriga, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn:

- Waa in aaney ka howlgeli goobta shaqada wax ka badan boqolkiiba 50 ama ka hooseya, sida lagu go'aamiyay xeerka dabka;
- Fadhiga dibedda waxaa loo oggol yahay 50 boqolkiiba awoodda;
- Dhammaan xafladaha iyo miisaska waa inay ahaadaan 5 marti ama kayar; iyo
- Fadhiisga baarka, cuto gurasho, qudaar gurasho lama oggola.

Xageen ka heli karaa macluumaad dheeri ah?

Magaalada ayaa wadeysaa in ay sii gudbisno macluumaadka ku saabsan Gobolka isla mark aan helno. Agab kasta oo ay Magaaladu abuurto waxay noqon doontaa mid lagu heli karo luqaddo kale. Isla markaas, waa inaad booqataa the [Washington state Department of Labor & Industries \(L&I\) website](#) (English only) Waxii macluumaad ah ee ku saabsan tilamaamaha dibu furida. Waxaad ka heli kartaa [Governor's Phase 2 guidance for restaurants and taverns here](#) (English only), waxaad kaloo heli kartaa dulmar guud [Governor's Safe Start Washington plan](#) here (English only).

Xafiiska Magaalada ee Horumarinta Dhaqaalaha (OED) wuxuu leeyahay boga [comprehensive resource page](#) oo ilahiisu u dhameystirany yahii ee ganacsiyada yar yar, hey'adaha aan macaash doonka aheyn, iyo shaqaalaha uu saameyey COVID-19. Boggan waa la cusbooneysiin doonaa markii macluumaad dheeri ah laga helo tilmaamaha Gobolka ee dib-u-furista ayaa la heli karaa.

Intaas waxaa sii dheer, Xafiiska heerarka Shaqada ee Seattle wuxuu leeyahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan masuuliyadaada sida uu dhigayo sharciga lacag bixinta qofka jiran [Seattle Paid Sick iyo wakhtiga Badbaadada](#) (PSST), iyo sidoo kale fasaxa lacag bixinta laxiriira COVID-19 ee hoos imanaya Sharciga ka Jawaabaya Coronavirus-ka Federalka (FFCRA). Labada fasaxa FFCRA iyo PSST labadaba waxay ilaaliyaan caafimaadka dadweynaha iyagoo hubinaya in shaqaalaha iyo caruurta ay guryahooda joogaan oo ay uga fogaaan karaan shaqaalaha, iskuulka, iyo macaamiisha markay jiran yihiin ama markay jiraan xaalad caafimaad oo degdeg ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan PSST, waxaad booqan kartaa Office of Labor Standards PSST COVID-19 Q&A here (waxaa lagu heli karaa luuqado badan) (available in multiple languages here). Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan FFCRA COVID-19 ayaa laga heli karaa halkan (Ingiriis oo keliya).

Tag Qalabka Isticmaalka!


Qalabkan dib-u-furista waxaa soo saaray Magaalada Seattle, waxaana loogu talagalay in lagu bixiyo macluumaad la heli karo, heer-sare ah kuna saleysan tilmaamaha ay dejisay Waaxda Caafimaadka iyo Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County si looga caawiyo shakhsiyaadka, qoysaska, iyo ganacsigu si guul leh in ay dib ugu bilaabaan adeegyadii gudaha ee marxaladda 2-aad. Tilmaamaha oo dhan waa la beddeli karaa waqti kasta.

Inta lagu gudajiro Wajiga 2 ee qorshaha bilowga nabdoon ee makhaayadaha iyo meelaha khamriga lagu cabo, cunteeyo gudaha lagu cuno waxaa la ogol yahay 50% inta dhismaha joogi karta markiiba, adeega banaanka waxaa loo ogolyahay 50% dadka ilaa iyo inta Magaaladu ay horey kuu siisay ogolaansho, mana loo adeegi karo xafladaha wax kabadan shan marti ah, mana la ogola fadhiisiga baarka, cuto gurasho, qudaar ama qudaar gurasho.


Liiska hubinta wajiga 2aad ee makhayadaha iyo meelaha

Caafimaadka iyo Amniga Shaqaalaha


Hubso in aad bixiso jawi shaqo oo badbaado leh oo aad wacyi geliso shaqaalaha adeegga guriga wixii ku saabsan calaamadaha, astaamaha, iyo qodobbada halista ee la xiriira cudurka COVID-19, iyo sida looga hortago faafitaanka coronavirus-ka ee shaqada. Macluumaadkaani waa inuu ku jiraa tillaabooyinka lagu qaadayo goobta shaqada si bulshadu u kale dheraato, gacmo-dhaqid joogto ah, iyo taxaddarro kale, oo lagu bixiyo luqadda uu shaqaaluhu si wanaagsan u fahmo. Booq bogga www.kingcounty.gov/covid to si aad uga hesho hagista caafimaadka dadweyne in kabadan 30 luqadood.




- Hubi in shaqaaluhu joogteeyaan in ay isu jirsadaan lix fiit. Hadeysan taasi suurta gal aheyn, waxaad ka yareysa jadwalka shaqada ama waxaad shaqaalaha u dhaxeysisaa wax kala qeybiya.




- Bixi oo sii shaqaalaha marada daboosha snaka iyo afka iyo gacngashi la tuuri karo marka la isticmaalo. Booqo seattle.gov/mayor/covid-19/seattle-protects si aad u hesho waji dabool adiga iyo shaqaalaha.



- Hubi gacmo-dhaqashada si isdaba-joog ah.




- U xilsaar kormeere COVID-19 wakhti/xili kasta oo shaqo isgoo howshiisu tahay kormeerida caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha uuna hubiyo nadaafada saxda ah, iyo in la raacay nidaamka baarista.




- Samee oo baar heerkul ah shaqaalaha ee astaamaha COVID-19 mar kasta uu soo galayo shaqada. Haddii shaqaale uu ka muuqdo astaamo, u diro guriga isla markaaba oo si qoto dheer u nadiifi aagagga / sagxadaha uu shaqaaluhu taabtay.

Caafimaadka iyo Amniga Macaamiisha


Muuji tilmaamaha caafimaadka guud ee ugu dambeeyay ee luuqadaha badan ee ku saabsan goobtaada. Caafimaadka Dadweynaha - Seattle & King County waxaad ka soo degsan kartaa buustrada darbiga lagu dhajiyo in ka badan 30 luqadood oo bilaash ah oo barta laga heli karo iyo oo bilaasha ah www.kingcounty.gov/covid.




- Bixi gacme nadiifye la heli karaa oo dhig albaakasta oo dhismaha lag soo galo.




- Xaqiiji in macaamiisha ay joogteyn karaan in ay isu jirdaaan lix fiit. Tan waxaa looga baahan yahay adeegga miiska, cunto qaadashada, tirinta lacag bixinta, iyo aagagga sugitaanka ee gudaha iyo dibedda dhismahaaga.




- Hubso macaamiisha inay fahmaan inay xirtaan dabooolida wajiga mar kasta marka laga reebo marka ay miiskooda fariisanayo ama hadii ay ka yaryihiin labo sano jir ama ay qabaan sabab caafimaad oo ka dhigaysa in aysan aaminin in ay wajiga xiraantaan.



- Isticmaal liiska tusaha cuntada – menus-oo mid keli ah sii miiska marka gudhaha lagu cunayo. Haddii shumacyo la saaro miisaska oo aan halka mar la isticmaalin, waa in la nadiifiyaa ka dib markay macaamil walba uu dhammeeysto cuntada. .



- aree shaqaalaha u adeegaya miis kasta; Hal shaqaale waa inuu qaadaa dalabka miiska, una keenaa cunnadooda iyo cabbitaankooda, oo ka qaadaa lacagtooda, iwm.



- Tixgeli in macamiishu ay aad rabitaan kood ku ogoladan in ay qoraan magaca, telfoonk numbarka, iyo maalinta ay soo booqdeen meheradaada si ay kaaga caawiso fududeynta raadintooda.

Waad ku mahadsan tahay iskaashigaaga!

IKHTIYAARADA RUQSADA BANAANKA EE AT-A-GLANCE

Ihadda maadaama oo ay Degmada King gashay Wajiga 2 ee Qorshaha Bilawga Amaanka ah ee Qorshaha, waxaan ognahay inuu jiro malkiilyaal badan oo ganacsigooda diyaar u ah inay dib u furaa ama balaadhiyaan shaqadooda banaanka, markaa waxa aanu abuuray xaashidan macluumaadka si aanu u bilawno!

In Wax Lagu Daro ama Loo Balaadhiyo Banaanka Ganacsigaaga Jidka ama Jidka Cagta

Hadii aad doonayso inaad isticmaasho makaanka banaanka ah ee jidka cagta ama wadada ku hor taala ganacsigaaga si aad uga samayso maqaaxi kumeel gaadha ah ama goob wax lagu iibiyo oo dheeraad ah ama hadii aad tahay mulkiilaha gaadhi cuntada lagu dhax iibiyo kaas oo isku dayaya meelo cusub, waxa aad u baahanaysaa Ruqsada Isticmaalka Jidka ee Waaxda Seattle ee Gaadiidka (Seattle Department of Transportation, SDOT).

Waxa aynu abuuray ikhtiyaaro ogolaansho cusub, oo dabacsan oo macmacaanlayaasha, mishiinka alaabta lasoo dhigo, iyo cuntada iyo waxyaabaha kale ee la iibinayo ee jidka cagta ah. Waxaa ruqsadahan la isticmaali karaa ilaa lix bilood.

- **Ruqsada Macmacaanlaha Banaanka ee Kumeel Gaadhka ah:** Waxa aad dalbataa ruqsadan hadii aad tahay mulkiile maqaaxi kaas oo doonaya inuu kuraas dhigo jidka cagta ama wadada agteeda meesha gaadiidka la dhigo. Ruqsad dheeraad ah oo ay bixiso Gudida Khamrida iyo Mukhaadaraadka Gobolka Washington ayaa loo baahanayaa si khamri loo iibiyo.
- **Ruqsada Mishiinka Soo Bandhiga Alaabta ee Kumeel Gaadhka ah:** Waxa aad dalbataa ruqsadan hadii aad tahay mulkiile tukaan kaas oo doonaya inuu ku balaariyo shaqadiisa banaanka jidka cagta ama wadada agteeda meesha gaadiidka la dhigo (waxa aad ogaataa inay ku jirto meesha wax lagu iibinayo).
- **Ruqsada Wax Iibinta Kumeel Gaadhka ah:** Waxa aad dalbataa ruqsadan hadii aad tahay cid wax iibisa oo aad doonayso inaad hesho dabacsanaan goobaha aad wax ku iibinayo iyo mudooyinka aad joogayso. Waxaa taas kamid ah wadooyinka iyo goobaha jidka cagta ee gaadiidka cuntada iyo miisaska cuntada la dhigo.

Fadlan ogsoonaw in maqaaxiya iyo tukaamada loogu baahan yahay inay sameeyaan wixii dayr ah ee loogu baahan yahay in lagu buuxiyo shuruudaha. Kharashka ruqsada waxaa weeye celcelis ahaan \$320 (waxaana ku jira qiimaynta iyo kharashka baadhitaanka). Waxa aynu balaarinaynaa oo aynu mudnaanta siinaynaa arjiyada noocyadan ruqsada, laakiin, wakhtiga dheeraadka ah ee qiimayn ah ayaa loo baahan karaa taas oo ku xidhan tayada arjiga ruqsada, murugsanaanta goobta, iyo cabirka dalabka.

In kasta oo ayna meel kastaa u qalmin ruqsadan, waxa aynu ku faraxsanahay in aynu kaala shaqayno ogaanshaha fursadahan!

Ku Darida ama fidinta Ganacsigaaga Banaanka ah Meel Gaadh Loo Leeyahay

Hadii aad xiiseyneyso inaad samayso ama aad balaariso goob banaanka ah oo hawlaha ganacsi ah ee hantidaada ah, waxa aad u baahan kartaa mid kamid ruqsadaha (Waaxda Seattle ee Dhismaha iyo Baadhitaanka (Seattle Department of Construction and Inspections, SDCI)).

- **Ruqsad Isticmaal Rasmi ah:** Waxa aad dalbataa ruqsadan hadii makaankaaga banaanka uu u jiro meel ka badan 50 fuudh aaga la degan yahay oo uu buuxinayo heerarka Xeerka Isticmaalka Dhulka Magaalada. Ruqsadani waxay kuu ogolaanaysaa inaad isticmaasho makaanka banaanka ee cusub si rasmi ah.
- **Ruqsada Isticmaalka Kumeel Gaarka ah:** Dalbo ruqsadan hadii aaga banaanku uu ku yaalo wax ka yar 50 fiid meel u jirta aaga la degan yahay ama hadii aad u baahan tahay dabacsanaan heerarka Xeerka Isticmaalka Dhulka. Ruqsadani waxay kuu sahlaysaa inaad isticmaasho makaanka banaanka ah ilaa afar todobaad, laakiin waa inaad kolba dib u dalbataa.
- **Ruqsada Isticmaalka Dhexaadka ah:** Dalbo ruqsadan hadii makaanka banaanka uu ku yaalo 50 fiid wax ka yar aaga deegaanka ama hadii aad u baahan tahay dabacsanaan heerarka Xeerka Isticmaalka Dhulka, iyo hadii ay tahay kaliya inaad isticmaasho makaanka banaanka hal ama laba maalmood todobaadkii. Ruqsadani waxay shaqaynaysaa sanad buuxa.

Kharashka ruqsadu celcelis ahaan waxaa weeye \$350. Waxa aynu balaarinaynaa oo aynu mudnaanta siinaynaa arjiyada ruqsadaha noocan ah. Iyada oo ku xidhan tayada arjiga ruqsada, waxaa ruqsada la qaadan karaa ilaa sadex todobaad si loo helo

Miyaad u baahan tahay kaalmo ama ma qabtaa su'aalo ku saabsan ikhtiyaaradaada?

Hadii aad qabto su'aalo ku saabsan ruqsada kala duwan ee aad heli karto ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo diyaarinta arjiga, fadlan nagala soo hadal 206-684-8090 ama iimeel noogu soo dir oad@seattle.gov wixii kaalmo iyo caawimaad farsamo oo bilaash ah.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan ruqsada hantida gaarka ah ee banaanka waxa uu ku jira websaytka SDCI ee www.seattle.gov/sdci/permits/how-do-you-get-a-permit.

Wixii ruqsada banaanka ah ee jidka iyo wadada cagta, waxa aad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah websaytka SDOT ee www.seattle.gov/transportation/permits-and-services/permits/temporary-permits



Ilaha Kale

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan macluumaadka soo socda, fadlan soo wac hay'adahaas. Markaad soo waceyso, hadaad ubaahantahay caawinaad luqadeed, fadlan noogu sheeg af ingiriiska luqada aad dooranayso. Mid ka mid ah shaqaale ku hadla labada luqadood ayaa ku soo waci doona, ama waxaan telefoonka ugu yeeri doonnaa turjubaan qolo saddexaad oo kaa caawiya wadhadalka.

Fadlan la soco in ay na soo wacayaan dad badan oo doonaya cawimaad, sidaa darteed waxay qadaneysaa in aad sugto wakhti dheer. Waxa kale oo aad sugi kartaa khadka talefoonka inta turjubaanka lagu soo xirayo.

| Mawduucyada | Hey'ada | Telfoon lambar |
|---|--|----------------|
| <ul style="list-style-type: none"> • Xeerarka Guud ee dib u furista. • Xisaabinta inta qof eee markiiba joogi karto rugta ganacsiga. • Barnaamijka Ilaalinta Jeegaga Deynta ah. Ka eeg websitka halkan here. • Xeerarka wax ka badalida kirada iyo guryo ka saarista. Ka eeg websitka halkan here. • Codsiga ogolaanshaha dibedda. | Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha- Office of Economic Development | (206) 684-8090 |
| <ul style="list-style-type: none"> • Ilaha dhaqaale ee laga heli karo Magaalada, Gobolka iyo Dowlada Dhexe. • Is Diiwaangelinta baaritaanka COVID-19 oo bilaash ah. Ka eeg websitka halkan here. | Xafiiska Adeegga Macaamiisha -Customer Service Bureau | (206) 684-2489 |
| <ul style="list-style-type: none"> • Soo sheegida waxyabaha eexda ku saabsan. Ka eeg websitka halkan here. | Xafiiska Xuquuqda Madaniga -Office for Civil Rights | (206) 233-7100 |
| <ul style="list-style-type: none"> • Talooyinka Caafimaadka Dadweynaha ee COVID-19. Ka eeg websitka halkan here. | Caafimaadka Dadweynaha ee Seattle-King County- Seattle-King County Public Health | (206) 477-3977 |